# Boolobooladii yarayd ee foosha xumayd

Waa sheeko uu qoray qoraaga dhaanishka ah ee magaciisa la yiraahdo H. C. Andersen. Waxa jiray cuf booloboolo oo ay hooyo booloboola ahi ku dilaacin jirtay ukunteeda. Hadda waxay sugaysaa boolobooolooyinkeedii yaryaraa, keli ayey dareemaysaa. Laakiin booloboolooyinkii yaryaraa waxa ay bilaabeen in ay ugxaantii ka soo baxaan. Ilmihii oo dhammi way ka soo baxeen ugxaantii laakiin hal xabo oo ukun ah oo weyn ayaa weli harsan. Hooyaddii booloboolada ahayd waxay ku fariisatay ukuntii ``Wax badan ayaan ku fadhiyey ugxanta, tanna woxoogaa kale waan ku sii fadhin karaa`` Hooyaddii booloboolada ahayd waa ay ku fadhiday oo ku fadhiday ukuntii ilaa ukuntii dilaacdo``Pip, Pip`` ayey tiri boolobooladii yarayd oo soo baxday, Waa uu weynaa oo foolxumaa. ``weynaan badanaa``; ayey tiri hooyadii booloboolada ahayd`` Run ahaantii waa uu qurux badanyahay ayey tiri hooyadii. ina keena ilmahaygiyow, waxa aan idin soo tusayaa aduunka ayey tiri hooyadii.

waa ay dabaasheen, waxana ay soo gaareen beerta booloboolooyinka. Halkaas waxa joogay qoysas booloboolooyin ah oo badan. `` Hooy, fiiri ilmhan boolaboolada ee foolxumada badan`` ayaa waxa yiri booloboolo ka mida booloboolooyinkii ay beerta ugu yimaadeen`` Haa, ma rabno in uu halkaan joogo`` ayaa waxa yiri mid kale oo qaniintay ilmihii boolaboolada ee weynaa`` Ha sameyn sidaas`` ayey tiri hooyadii booloboolada ahayd « ha dhibin.`` `` waan dhibaa waayo wuu weynyahay, sisi waaye mana rabno in uu halkaan joogo``, ayey tiri boolobooladii kale`` ma uu qurux badna``, ayey tiri hooyadii booloboolada ahyd`` lakiin waa farxaan naxariisbadan, sifiicanna wuu udabaashaa. Ilmaha boolaboolada oo dhan wakhtifiican ayey ku qaataan beerta boolaboolada laakiin ilmaha boolaboolada ee weyn waa

la riixayey, oo la haraatiyayey oo la caynayey oo la dhibayay. Cidi uma naxariisana. Maalintii u horaysay sidaas ayuu ku dhamaystay, maalmihii ka danbeeyeyna waabay kas ii daraayeen.



*Ender. Foto: Pixabay*

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa ilmihii weynaa ee fooshaxumaa ee boolabooladu waxa uu ku fikiray`` intaa in ka badan looma adkeysan karo`` intuu orday ayuu ooda(bowdka) ka booday. Dhinaca kale waxa joogay shimbiro yaryar. Waa ay ka cabsadeen. `` Ma foolxumadayda ayey ka cabsadeen ayuu is weydiiyey``;waa calool xumo. ilmihii boolaboolada ee foosha xumaa waa uu orday, ilaa uuka gaaray meel aanay boolobooolooyin degeneyn. Halkaan ayuu dagey, waa uu daalanaa waanu niyad xumaa. Laba beri ayuu halkaan joogay. Waa uu socdaalay. waa uu duulay oo dabaashay oo maquurtay. Laakiin xayaawanadii kale lama ay hadlin, waayo waa uu foolxumaa. Hadda waa dyr,

caleemaha geeduhu jaale ayey noqdeen oo dhulka ayey ku soo dhaceen, oo qabow ayey noqotay. Ilmihii boolabooladu xaaladiisu ma fiicnayn. Galab markii qorraxdu dhacday, ayaa waxa imaaday shimbiro badan oo cadcad oo waaweyn waxay ahaayeen xuunsho.

Ilmihii boolabooladu waxa uu is yiri waa qurxoon yihiin! baalasha intay furteen ayey duuleen si ay dal kulul u tagaan, oo uga tagaan jiilaalkaan qabow Ilmaha boolabooladu waxa uu jeclaa in uu raaco, wadnaha ayaa aad u garaacay, laakiin wuu kari waayey in uu la duulo. Ma uu garanayn magaca shimbirahan ama meesha ay u socdaan, laakiin wuu jeclaaday, waxa uu jeclaystay in uu raaco oo la joogo, malaha waxa ay noqonlahaayeen saaxiibadiis in kastoo uu foolxunyahay.

Jilaalkii wuu yimid qabowgiina wuu sii batay. Waa uu dabaashay laakiin waxa ku soo da,ay biyihii baraf fara badan. Ugu danbaystii waa uu dabaalan kari waayey waxan ku dhagay barafkii, wey ku adkaatay ilmihiiboolaboolada. Kali ayuu ahaa. Laakiin maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxa yimid gugii, qoraxdiina waxa ay biloday in ay dhulka kululayso, ubaxyadii u horeeyeyna waa ay soo baxeen. Ilmihii boolabooladu waa uu farxay. Waxa uu uduulay biyo fiican oo beer ku dhow. Halkaa! Halkaa waxa ugu yimid seddex shimbirood oo cadcad oo fiican. Aad ayey u qurxoonaayeen sifiicana ayey u dabaalanayeen. ``Xagoodaan ayaan u dabaalan,`` hubaal wey i dili, waayo waan foolxumaxay. Laakiin waxa laqaatay iyaga oo i dila intii cidkastaa i dhibi lahayd.`` Waxa uu u dabaashay xagii xuunshooyinka. Waxa ay fureen baalashoodii.``Haa, iska kay dila.`` ayuu yiri ilmihii boolabooladu intuu hoos u fiiriyey biyaha. Biyaha dhexdooda ayuu waxaa uu ka arkay humaagiisii. Laakiin muxuu ka arkay biyaha dhexdooda? Ma uu arag ilmo booloboolo oo foolxun ee waxa uu arkay xuunsho qurux badan. Isaga naftirkiisa ayaa ilayn ahaa xuunsho! Ilmo ayaa biyaha soo galay.`` fiiri

halkaas waxa jooga xuunsho,``ayey ku dhawaaqeen.``waana mid cusub. Waa kan ugu qurxoon!``Xuunshooyinkii kale si fiican ayey u salaameen, Ilmihii boolabooladuna waa uu xishooday(qajilay), laakiin aad ayuu u farxay.

# SAASHA 1

**SAX AMA QALAD**

1. Hooyada boolaboolada ahi hal ukun ayey ku haysatay cufka.

2. Hooyada boolabooladu waxay u malaynaysay in aabaha boolobooladu yahay tosk.

3. Ukuntii u danbaysay ee dilaacdaa waxa ay ahayd ta foosha xun.

4. Ukunta u dabaysay wey yareyd oo foolxumayd.

5. Kuwa kale ayaa dhibay ta foosha xun

6. Ka foosha xun waa uu iskaga tagay qoyskiisii.

7. Ka weyni waxa uu u arkay in ay xuunshooyinku qurxoonyihiin.

8. Waxa uu u malaynayey in xuunshooyinku ay dilayaan.

9. Waa dhaxmooday jiilaalkii.

10. ilmihii xuunshadu waxa ay dhaheen waa ka ugu qurxoon xuunshooyinka.

## Liis eroyo soomaali/ noorwiiji ah iyo bogag muhiim ah oo netka ah.

- Deilig- macaan
- et vann- biyogaleen

- en bondegård- beer
- En and- booloboolo
- Et reir- cuf
- å ruge, ruget, har ruget, ukun ku fariisi
- å ligne på, lignet på, har lignet på- u ekaansho
- En tosk- malaay
- å gå i stykker- Halaabo/googo,o/jajabo
- å la lot har latt- ogolaanho
- å bite bet har bitt- qaniinyo
- å plage plaget har plaget- dhibid
- rar- sisi
- å dytte dyttet har dyttet- riixid
- å sparke sparket har sparket- Haraati/laad
- å mobbe mobbet har mobbel- caytin
- dårlig verre verst- xun
- å fly, fløy, har fløyet- duulis
- Gjemme, å gjemme seg gjemte seg har gjemt seg- dhuumasho
- En ving- baal
- Et blad- caleen
- å drepe drepte har drept- dilid
- flau- Qajilaad/xishood
- vakker- qurxoon
- klok- caqlibadan
- å redde, reddet, har reddet- badbaadin